



## **Somaliland Non State Actors Forum**

**Location:** Jigga-yar, Badda As, Behind WHO Office

**Tel:** +252-(0)-63-570536, +252-(0)-63-4414335

**Website:** [www.sonsaf.org](http://www.sonsaf.org)

---

Date: 12/05/2016

## **Warqaddii Afaraad ee Diiwaangelinta Codbixiyayaasha**

### **Warbixinta Hordhaca ah, ee Diiwaangelinta Codbixiyayaasha Degmooyinka Hargeysa iyo Sallaxley**

#### **Koobid:**

Bishan Abriil 30-keedii , 2016 waxa ay diiwaangelinta codbixiyayaashu dib ugabilaabantaygobolkaMaroodijeex, ka dib hal bil oo loo hakiyey abaarihii baahsanaa ee dalka ka dhacay. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliland Mudane Axmed Maxamed Maxamuud (Siilaanyo) ayaa si toos ah u daah-furayxafladdiilagubilaabayay diiwaangelinta gobolka ugu dadka badan ee Maroodijeex.

Toddobaadkii ugu horreeyay ee diiwaangelinta, Dalladda SONSAF oo kaashanaysa, madasha ururada bulshada ee arrimaha doorashooyinka (SCISEF), waxa ay u kala dirtay gobolka Maroodijeex, 67 goobjoogayaal maxalli ah, kuwaas oo gaadhay 145 goobood oo ka mid ah 183 goobood oo diiwaangelintu ka socotay, Taas oo ka dhigan in dalladdu gaadhay 79.2%.

Goobjoogayaashu waxa ay soo tebiyeen in horumar weyn laga sameeyey, cilladihii farsamo ee ka dhici jiray goobaha diiwaangelinta.. Tan waxa sababay iyada oo badi shaqaalaha goobaha diiwaangelintu ay hore uga soo shaqeeyeen, degmooyinka Gabiley iyo Balligubadle iyo korodh lagu sameeyay kooxda cillad saarista. Arrintani waa guul la taaban karo oo ay sameeyeen Guddida Doorashooyinka Qaranku, taasi oo dallada SONSAF na ay ku ammaanayso.

Goobjoogayaashu waxa kale oo ay soo sheegeen, in dadka u soo baxay isdiwaangelinta ee imanayay goobaha diiwaangelintu ay aad u yaraayeen, marka loo eego sidii la filayay. Taasi waxa ay dhalisay in Wasiirka Wasaaradda Waxbarashadu, uu ugu gooddiyoardayda dugsiyada sare, in aanay geli doonin imtixaanka, haddii aanay qaadan kaadhka codbixinta. Dalladda SONSAF waxa ay u aragtaa, in qaadashada kaadhka codbixintu ay tahay mid go'aan shaqsiyeed ku xidhan, ee aanay noqon karin wax lagu jujuubo qofka.Dhanka kale SONSAF waxa ay

dhiirigelinaysaa in la qaato kaadhka codbixinta, oo ah xaq muwaadinka u gaar ah oo uu ku dooran karo mustaqbal cidda uu rabo.

Dalladda SONSAF waxa ay si gaar ah iyo si guudbaugammaanaysaa Golaha Wakiilada Jamhuuriyadda Somaliland, inay meel mariyeen wax ka beddelkii iyo kaabistii ay ku sameeyeen xeer kadi waangelinta codbixiyeyaasha, ee u hore Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland Mudane Axmed Maxamed Siilaanyo uga codsaday. Tani waa guul weyn oo ay gaadheen dhammaan daneeyayaasha arrimaha doorashooyinka, waana sansaan muujin karta, in doorashooyinka Madaxtooyada iyo Baarlamaanku ay mar ku wada qabsoomi karaan si guul ah. Dhanka kale SONSAF waxa ay Guddida Doorashooyinka Qaranka ku dhiirigelinaysaa inay la yimaadaan, qorshe hawleed cayiman oo qeexaya hawl socodsiiinta arrimaha doorashooyinka, si wax badan loo sii kala ogaado, ka hor maalinta doorashada. SONSAF waxa kale oo ay ka digeysaa dhibaato kasta oo ku iman karta xisbiga UCID dhexdiisa. Iyada oo ku boorinaysa garabyada xisbigu inay ku dhammaystaan arrimahooda, hab xeerarka iyo sharciga u yaalla xisbiga iyo waddanka waafaqsan.

---

## **Warbixinta Guud**

Diiwaangelinta codbixiyaaashu waxa ay dib uga billaabantay, Hargeysa iyo Sallaxley bishii hore 30-keedii, ka dib hal bil loo hakad la geliyey, abaarihiibaahsanaa eedalka ka dhacay awgeed. Inkasta oo dhammaan gobollada dalku helay roobabkii gu'ga oo si wacan uga curtey waddanka, haddana waxa jira goobo badan oo ka mid ah waddanka oo la itaal daran abaaro.

Diiwaangelinta codbixiyayaasha ee ka socota Hargeysa iyo Sallaxley, waxa ay u socotaa hab nabadgalyo ah, iyada oo aan illaa hadda la soo sheegin wax mushkilad ah oo goobahaasi ka jirta. Goobjoogayaasha maxalliga ahi waxa ay soo tebiyeen, in dhammaan shaqaalaha goobaha diiwaangelintu ay shaqada u wadaan si habsami ah, iyaga oo ka faa'iideystay waaya-aragnimadii ay ka soo kasbadeen goobihii hore ee ay ka soo shaqeeyeen ee Gabiley iyo Balligubadle, iyo in ay aad u yaraatay cilladaha farsamo ee ku yimid goobaha diwaangelinta, marka loo eego gobolladii hore oo arrintaasi aad ugu badnayd, arrintani waxa ay ka danbaysay markii KDQ ku ay kordhiyeen kooxaha cillad saarayaasha ee ka shaqaynayay Hargeysa oo ka tiro badnayd gobollada kale. Tani waa sansaan horumarineed oo laga sameeyey dhinacyo badan oo ay ku ammaanahan tahay Guddida Doorashooyinka Qaranka. Dhanka kalena goobjoogayaashu waxa ay xuseen in mushkiladda ugu weyn ee hor taagnayd ay ahayd, in dadka isdiiwaangelinayaa ay aad u yaraayeen.

Goobjoogayaashu waxa kale oo ay soo weriyeen. in goobo badan oo ay ka socotey diwaangelinta codbixiyayaashu, ay ku arkayeen dad ka urursanayay warqadaha codbixiyaha la siinayo. Inkasta oo aan la garanaynin sababta rasmiga ah ee ka danbaysa, haddana waxa loo malaynayaa in

shaqsiyaad raba inay ka qeyb qaataan doorashooyinka Baarlamaanku ay arrintaas samaynayaan, si ay u sii saadaalin karaan cidda u codeyn doonta hadhow iyo cidda kale, si ay ugu noqoto dhiirrigelin. Si kastaba ha ahaatee SONSAF waxa ay aaminsan tahay, in arrintani ka hor imanayso xorriyadda muwaadinka ee uu xaqa ugu leeyahay inuu cidduu doono u codeyn karo iyo inay ka hor iman karto shuruucda waddanka u taal.

Dhanka kale waxa ay goobjoogayaasha maxalliga ahi soo sheegeen in goobo cayiman ay ka dhaceen shaqaaqooyin, shaqaalihii goobtaasi kaga yimid xubno xildhibaannada golaha deegaanka iyo ciidamada ammaanka ka mid ah. Tusaale ahaan subaxii Sabtida ee bishu ahayd 30-ka Abriil, xarunta diiwaangelinta numberkeedu ahaa 335, ayaa waxayimid xubnoogolahadeegaankacaasimadda ah, oo uu la socday Maayarka caasimaddu, ka dib markii guddoomiyihii goobtu weydiyey kaadhka aqoonsigooda, ayaa waxa gacan u qaaday guddoomiyihii, xubin ka mid ah golaha deegaanka ee caasimadda, isaga oo ku eedeeyay inuu garan waayey Maayarkii Caasimadda. Sidoo kale maalintii Axadda ee bishu ahayd 1-da May xarunta diiwaangelinta ee numberkeedu ahaa 327 ayaa waxa ka dhacay, in nin sarkaal boolis ahaa uu gacanta u qaaday aflagaadana ugu darey guddoomiyihii goobtaasi, ka dib markii uu guddoomiyuhu ku yidhi sarkaalka soo gal safka ee ha soo dhaafin dadka. Si kastaba ha ahaatee SONSAF waxa ay si xooggan ugu dhiirrigelinaysaa saraakiisha iyo maamulka dawladdaba inay ixtiraamaan shuruucda iyo nidaamka dalka u yaalla, ee aanay isku arkin in ay iyagu leeyihiin awood sharciga ka sarreysa.

Ugu danbeyntii goobjoogayaashu waxa ay ku ammaanayaan doorkii wacnaa ee xisbiyada Qaranku ka qaateen kormeerkii ay ku sameynayaan goobaha diiwaangelinta dalka, iyaga oo weliba ixtiraamayheshiiskii ayla saxeexdeenguddidadoorashada. Dalladda SONSAF waxa ay ku dhiirrigelinaysaa xisbiyada Qaranku inay iska ilaaliyaan adeegsiga astaamo muujinaya calanka xisbiga marka ay goobaha diiwaangelinta booqanayaan, iyo inay u dhaga nuglaadaan Komishanka Doorashooyinka Qaranka.

## **Geba-gebo**

Wareeggii koowaadeediwaangelinta Hargeysa iyo Sallaxley, waxa uu ku dhammaadey si guul ah, iyada oo horumar weyn laga sameeyey dhinaca cilad ka saarista, sida ay qireen goobjoogayaashu. Guntii iyo gebagabadii Dalladda SONSAF waxa ay ku ammaanaysaa sida kartida leh ee Guddida Doorashooyinka Qaranku u qabteen hawshaasi baaxadda leh, iyaga oo muujiyey, hufnaan, caddaalad, iyo karti, taas oo abuuraysa kalsooni ay ku qaban karaan doorashooyinka innagu soo socda. SONSAF waxa ay aaminsan tahay in jidka ay jeexeen Koomishanka Doorashooyinku, ay horseedi doonto, guul weyn oo aynu ka gaadhno hannaanka dimuqraadiyadeed ee doorashooyinka innagu soo socdaa u dhici doonaan